


## Mitral Stenosis

Dhuubashada Daboolka Dhiigga ama MS



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, P.A., 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

---

## Dhuubashada Daboolka Dhiigga ama MS

Mitral Stenosis (MS)

Mitral Stenosis (Dhuubashada Daboolka Dhiigga ama MS) waa dhuubashada daboolka dhiigga. Dhuubashasu waxa ay ka hortageysaa inuu si fiican u furmo daboolka dhiigga, oo waxa xayirmaya qulqulka dhiigga ee ka imaanaya qalbaca bidix kore ilaa qalbaca bidix hoose iyo jirka kale. MS waxa ay badanaa lala xiriirtaa cilladaha kale ee wadnaha ee lagu dhasho, sida Xanuunka Shone's. Xayiraaddaas waxaa lagu arki karaa heerka waalwalaha liifadda ah, muruq wareegsan, muruqa iskuxirkha, iyo/ama qeybta dhuuban ee halbowlaha weyn (wareegga daboolka qeybta dhuuban). Laga yaabee muruq dhuujisma ayaan diyaarsaneyn (sameysmin), oo dhuubasho ayaa dhaceysa. Caadi ahaan, xayiraad ayaa lagu arkayaa in ka badan hal heer oo ah MS lagu dhasho. MS nooca ah caabuqa bararka ah ee jirka gudihiiisa dadka waaweyn ayaa u badan, oo naadir ayey ku tahay dhallaanka ama ilmaha. Nooca caabuqa ee MS, daboolka muruqa ah ayaa adkaada oo kala-qeybiyaha ayaa isku milma oo muddo ka dib yeesha kaalsiyam, taas oo keenta in uu daboolku dhaaqdhaqaaci waayo. Dhuubashada muruqa daboolka ah ayaa dhici karta haddii ilmuu qabo infakshan ah bakteeriyo. Sabab kasta oo jirta, xannibaadda muruqa daboolka ah waxay keentaa unugweynaad ah qalbaca bidix (ballaarnaan), xididdada sambabada iyo dhiigkarka halbowlaha (cadaadis sare) oo waa wax natijadeedu tahay unugweynaad ah dhinaca midige (ballaarnaan).

### Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:

- Carruurta qabta MS fudud ma laha wax calaamado ah (waa calaamada-laawayaal).
- MS nooca daran, dhallaanka waxaa ku dhacda dhibaato ah neefsashada, korriinka oo xumaada iyo koboc maskaxeed oo ah goor hore.
- Carruurta waaweyn ee qabta MS ah dhexdhedaad ama daran waxa ku dhacda naqas la'aan (neefsashada oo ku adkaata) oo ah mid fiican ama aan fiicney.
- Kala-fogaansho ah xididdada qoorta ayaa ku dhacda oo wadnaha midigta u yaalla ayaa xumaada.
- Dhawaqa wadnaha ee koowaad iyo labaad ayaa yeelanya sharqan, qac ah dhiigga soo baxaya, oo sharqan furan ayaa laga maqli karaa.
- Guuxa dhiig sambab daadanaya ayaa jiri kara oo mudda ah dhiigkar sambab ayaa la soconeysa.
- Garaaca wadnaha oo aan caadi ahayn naadir ayey ku yahay carruurta, laakiin waa wax dhici kara.

### Cilladsheegid:

- Raajada Xabadka: Weynaanshada qalbacyada midig hoose iyo bidix kore iyo halbowlaha sambabada oo ay qeyb weynaato ayaa badanaa dhacda. Caadi ahaan waxaa la arkaa cirir ku dhaca xididdada sambabada iyo barar ah mindhicirka.
- EKG: Unugweynaad ku dhici kara qalbacyada bidix kore, midig hoose, iyo leexasho ah dhidibka midig.
- Ultarasawnka wadnaha: Cilladsheegid.

### Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:

- MS fudud ama ah dhexdhedaad waa in daawo loo qaato, sida nooca biyaha jirka ka saara (Lasix).
- Dhallaanka qaba MS daran sheybaarka tuubbagelinta ayaa looga buufin karaa waalwalaha si loogu dibdhigo qallinka iyo si ay u helaan wakhti ay ku soo koraan.
- Bacterial endocarditis prophylaxis (Infakshanka bakteeriyyada wadnaha ama SBE) ee qalliuun ilkaha ka hor ayaa laga daaweynayaa.
- Marka MS lagu dhasho oo ay keento qandhada caabuqa gudaha waa inay qaataan antibiyootig ah ka-hortegid si aysan ugu soo noqon.
- Qaliinka ama beddelaadda daboolka ah waalwalaha waxaa badanaa lagula taliya ilmaha lagu arko calaamadaha lagu dhasho ee MS ama ilmaha aan calaamadaha lahayn balse lagu arko cadaadis badan oo ah sambabada (eeg Beddelaadda Daboolka Dhiigga Celiya).
- Carruurta loo geliyo daboolka waa in loo qoro Coumadin iyo Aspirin si looga hortago xinjirowga.
- La-socosho ah wadnaha oo dhacda 6 ilaa 12 bilood oo kasta hal mar ka dib qallinka ama beddelaadda daboolka dhiigga celiya.

---

**Dhuubashada Daboolka Dhiigga ama MS**  
Mitral Stenosis (MS)

**Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:**

- Carruurta qabta dhuubashada daboolka dhiigga celiya ee lagu dhasho marka aan laga daaweyn si aad ah ayey dhintaan, oo celcelis ahaan noloshoodu waa ilaa 3 jir.
- Natiijooyinka mustaqbalka-fog waa ay kala duwan tahay oo waxay ku xiran tahay sida daboolku u shaqeynayo iyo haddii uu xanuun kale jiro.
- Qalliiin labaad oo ah daboolka dhiigga celiya waa wax caadi ah.
- Bacterial endocarditis prophylaxis (Bakteeriyyada infakshanka wadnaha) in laga daaweyyo ayuu u baahanayaa ilmaha laga beddelo daboolka dhiigga.